

# WAXA KA DHALANAYA KU TALAABSIGA ADEEGSIGA DAROOGADDA IYO NIDAAMKA

Kuwa soo socdaa waa waxa ka dhalanaya ku tabaalsiga adeegsiga aalkoladda iyo daroogadda, waxaa laga soo xigtay Fulinta Hab-maamulka Dugsiyadda Degmadda ee aalkoladda iyo daroogooyinka kale iyo tubaakkadda si aad u eegato booqo shabakadda caalamiga ah iyo xidhiidhka xagga hoose ku lingaxan

[http://www.pps.k12.or.us/files/board/4.30.022\\_ADAcoholOtherDrugsTobacco\\_FINAL\\_7.10\\_1.pdf](http://www.pps.k12.or.us/files/board/4.30.022_ADAcoholOtherDrugsTobacco_FINAL_7.10_1.pdf)

## **Qeexidda.**

- Daroogo: waxaa ku jira maandooriye walba ama la mid ah, marka lagu daro aalkoladda, ee aan ahayn mid ardayga loogu qoray xaalad caafimaad.
- Daroogadu waxay hoos uridaa waxbarasahdda: waxay ardayda ka dishaa barashadda, ka qayb qaadashadda ama dabciga tan oo sabab u ah daroogadda ama aalkoladda oo radisa jidhka
- Arimaha la xidhiidha adeegsiga daroogadda: waxaa ka mid ah walow aysan ku koobnayn adeegsiga, isdhaafsiga, iibinta ama haysashadda, marka lagu daro aalkoladda, daroogadda haysashadda, daroogadu waxa ay dishaa waxbarashadda, waxa ay saamaysaa hab-dhaqanka, iyo adigii oo umuuqda in aad caawinayso ama aad suuqgaynayso howlaha oo kale, caawinta iyo suuqgaynta waxaa ka mid ah joogitaankaaga melaha daroogadda lagu hayo, marka lagu daro aalkoladda, oo la adeegsaday, lakala bedeshay, la iibiyey ama la la haystay; ama ka qayb qaadashadda fal walba oo caawin ah ama aad ku hagaysay howlo la xidhiidha daroogadda.

Haysashadda, iibinta, daroogo ama aalkolo wax udhimaysa waxbarashadda, ama adeegsiga aalkoladda, daroogadda ama wax la nooc ah lama ogola in arday, shaqaale ama qof kale uu ku haysto dugsiga, ama dhismayaasha dugsiga, inta ay socdaan howlaha dugsiga. Iyadii oo ay jirto in qaantuunkan lagu dabaqayo aradya inta lagu jiro saacadaha dugsiga iyadda oo aan loo eegayn goobta uu markaa ku suganyahay.

Raadraac: [4.20.046-AD](#), [4.30.010-AD](#), [4.30.022-AD](#)

## **Ciyaaraaha**

Qawaaniinta la xidhiidha adeegsiga aalkoladda iyo daroogadda waxaa sidoo kale lagu dabakhayaa ka qayb qaatayaasha barnaamijyadda ciyaaraaha ee todobada (7)cisho, 24ka saac ee maalinta ee xiliga oo dhan kan ay ardaydu ka qayb qaadanayaan ciyaarahaa goobtay noqotaba. Tixraac: [4.30.020-AD](#)

## **Nidaamka Asaasiga ah ee Loo Qaadayo Marka uu Tuhun Dhaco:**

Degmadu waxay leedahay nidaamka sharchiyo lagu maareeyo xaaladaha la xidhiidha falalka la xidhiidha daroogadda kuwan oo lagu dabaqayo ardayda oo heer walba leh ee dugsiyadda oo dhan. Qoysaska waa lagu wargelin doonaa iyo in ay ka oga qayb qaataan si cadilan marka ardaygu ku lug lahaado aalkoladda iyo daroogooyinka kale.

1. Marka ay dhacdo in aradygu ku lug yeesho falal la xidhiidha darag, maamulaha ama howlwadeenka loo xilsaaray waxay:

- Hubin doonaan in baadhin dhab ahi ay jirtay.
- La Qaadan doonaan kulan aan toos ahayn ardayga si ay ugu wargeliyaan ardayga tuhunka adeegsiga daroogadda ee la sheegay luqad uu ardaygu fahmi karo, islamarkaana siin doonaan ardayga fursad uu isku difaaco ama ku sharxo sida ay isaga/iyadda la tahay in ay wax udheceen.

2. Hadii maamulaha ama Howlwadeenka loo idmaday ay cadeeyaan in ardayga uu ku xadgudbay xeerarka u degsan degmadda ee la xidhiidha daroogadda, maamulaha ama howlwadeenka loo xilsaaray:

- Waxay iyagii oo niyadsan ku dadaali doonaan in ay wargeliyaan waalidka/hagaha telephone-ka sidoo kalena waa in ay u diraan qoraal waalidka/hagaha luqad uu fahmi karo tan oo ay ugu faahfaahinayaan xadgudubka dhacay.
- Waa in aan ardayga dugsiga laga xayirin:
  - Hadii ardaygu saamaysanyahay, siday noqotaba ardayga waa in laga joojiyaa dugsiga maalinta inta ka hartay. Waa in waalidka lala xidhiidha ka hor inta aan Ardayga aqalka loo dirin.
  - Hadii tuhunku uu yahay kala wareejin ama iib dugsiguna uusanlahayn shaqaale ama goob lagaga sooco ardayda kale.

- Waa in lagu wargeliyaa ciidanka sharci fullinta hadii marqaatigu cadyahay in qaantuunka meel lagaga dhacay.
- Waa in loo diyaariyaa dhagaysi edaysanaha la tuhmay.
- Waalidka/Hagaha waa in lagu wargeliyaa luqadda ay fahi karaan iyadii oo la wacayo ama warqad qoraal ah loo dirayo, islamarkaana lagu marti qaadaa in ay kasoo qayb galaan dhagaysiga.

### **Nidaamka Dhagaysiga.**

1. Heerka A ee dhagaysiga waa in uu qabtaa maamulaha ama howlwadeenka loo idmaday. Dhamaan mudhaanta kale oo dhan, heerka wargelinta dugsiga, dhagaysiga, iyo shuruudaha go'aanka ee hab-maamulkan waa in ay noqdaan wargin isku mid ah, dhagaysiga, iyo shuruudaha go'aanka ee eryidda sida lagu dhigay 4.30.021-AD
2. Hadii la cdeeyo in uu ardaygu qayb ahaan ku jiray falalkaa daroogadda la xidhiidha, howlwadeenka dhagaysigu waa in uu meel mariyaa shuruudaha oo keliya sida loogu xusay xagga hoose.
  - o Qoysaska waa in lagu wargeliyaa xiliga dhagaysiga kхиаarka ay u leeyihii in ay soo bandhigaan qorshe badiil ah (eeg qaybta hoose) laba cisho gudahooda xiliga dhagaysiga degmadda iyo howlwadeenaduna waa in ay ku caawiyaan qoyska iyo/ama qareenkooda ucadaynta illaha macluumaad ee beesha.
3. Ka Baaqsiga Imaanshaha Dhagaysiga
  - o Dadaal macquul ah waa in lagu bixiyaa sidii loo suuragelin lahaa in waalidka/hagaha iyo marka ay haboontahay ardayguba ay soo xadiraan dhagaysiga. Hadii ay waalidka/hagaha/ardaygu ku guuldaraystaan kasoo qaybgalka dhagaysiga, howlwadeenka dhagaysiga waa in uu dib dhigaa dhagaysiga qoraa go'aanka, islamarkaana udira nuqul waalidka/hagaha iyo ardayga.
4. Xiliga dhagaysiga, waalidka/hagaha iyo ardayguba waxay yeelan karaan qareen soo bandhiga cadaynta, keena marqaatiyadda, waydiiya su'aalo marqaatiyaasha, islamarkaana sharxa dhankooda sida ay u arkaan arintan. Howlwadeenka dhagaysiga waa in uu tixgeliyaa dhamaan cadaymaha.
5. Xaaladaha Daruuriga ah.
 

Hadii la cadeeyo in ardaygu ku xadgudbay qawaaniinta, howlwadeenka dhagaysiga waxa uu meel marinaya shuruudahan(eeg halka ugu dambaysa qaybtan ee lagu dhaqayo ardayda itaalka daran)

  - a. Heerka A: Xadgudubka koowaad, marka laga reebo kala bedelashadda iyo iibk:
    - Aradaydu waa in au xadiraan iyagga oo la socda waalidka/hagaha 6 saacadood oo fasal ah.
    - Ardayga waxaa laga reebayaa in uu ka qaybgalo, tartanadda iyo/ama in uu matalo dugsiga tartanadda ay dugsiyadu martigeliyan, ciyaaraha, bandhigyaadda, raqsiga iyo dhamaan howlaha la midka ah kuwan oo baxa dugsiga kadib, ama goob dibadda ka ah dugsiga, 28 cisho oo xidhiidh ah marka laga bilaabo maalinta xigta dhagaysiga.
      - o Hadii dhacdadi ay tahay mid akadeemiyadeed islamarkaana laga doonayo ardayda in ay dhibco ku helaan, badiil ku haboona uusan jirin, maamulku wuu u ogolaan karaa ardayga in uu ka qayb qaato.
    - Ardayga sidoo kale waxa uusan ka qayb galayn howlaha ay dugsiyadu soo martigeliyan ciyaaraha, badhigyaadda, raqsiga, iyo howlaha kuwa la nooca ah kuwan oo baxa dugsiga kadib ama ka baxa goob dugsiga ka baxsan 28 cisho oo xidhiidh ah marka laga bilaabo maalinta xigta dhagaysiga.
      - o Kuwa ciyaaraha fudud, bandhige iyo/ama ka tirsane koox, naadi, iyo ururka dugsiga waxaa la dul dhigayaa shuruudo dheeri oo ku jeeda xaadiridda dhacdooyinka iyo tababaradda, marka laga reebo dhardhid, iyo tartan la'aan.
      - o Ardayga waxaa dhici karta in laga doonayo in uu caadiro tababaradda, kulamadda, iwm, isaga iyo kooxdaba ama ururkaba walow uusan matali karin dugsiga inta lagu jiro 28kaa maalmood.
      - o Awooda maamulka, ardayga waxaa la eryi karaa shan (5) cisho oo xidhiidha ah iyo/ama laga doonayaa in uu guti illaa iyo sideed (8) saacadood oo adeega bulshadda oo ansax ah.
    - Ardayda aan gaadhin heerkii laga doonayay ee waxbarashadda ee kusii jeeda dhamaysiga shuruudaha heerka A afar todobaad gudahood marka laga bilaabo xiliga dhagaysiga waa la eryi doonaa. Eryidda dib baa loo dhigi doonaa hadii ardayda laga aqbalo barnaamij la

ansixiyey ee dugsiga ee badiilka ah ama adeeg dawayn oo taabanaya arimaha aalkoladda iyo daroogadda ee ardayga. Inta lagu xilgaa ardayga waxaa laga reebayaa dhamaan howlaha dugsiyadda degmadda iyo dugsiyadda degmooyinka kale oo dhan. Hadii barnaamijka badiilka ah ama adeegga dawaynta uu si wanaagsan ku dhamaysto eryiddu ma jiri doonto. Horukac la taaban karo waxaa lagu qeexaa isagii oo soo dhamaystay adeegyadda shuruudihii adeegyada beesha, hadii ay jiraan, iyo in aysan jirin maqnaansho aan cududaar ahayn oo ku jeeda fasalkii anshaxa.

b. Heerka B: Xadgudubka sadex sanadood gudahood ah ee kala bedelashadda ama iibinta ama ku caawinta kala bedelasho ama iibinta daroogadda ama xadgubka labaad sadex sanadood gudahood hadii uusan kii hore ahayn kala bedelasho ama iib:

- Arday waa la eryaya iyo, marka lagu doro, waxaana la siinaya waxbarasho aan ahayn barnaamijyadda dugsiyadda badiilka ah ee degmadda, ama
- Eryidda waa la dib dhigayaa hadii ardayga laga aqbalo barnaamijyadda badiilka ah ee dugsiyadda la ogolyahay ama adeegyadda dawaynta ee taabanaya arimaha aalkolo iyo doroogo ee ardayga.
- Si looga aqbalo dugsiga loo duway ama dugsiga degmadda kale, ardaygu waa in uu ka qayb gala barnaamij dhaqan celin oo ay degmadu aqoonsantahay(ee aysan dhaqaaluhu degmadu bixinaynin) iyo/ama ogolaado qorshe uu aqoonsaday maamuluhu ama howlwadeenka loo xilsaaray si loo illaaliyo ardayga iyo dugsiga falal dambe oo la xidhiidha daroogadda.

c. C: Xadgudubka labaad sadex sanno gudahood, hadii kii hore uu ahaa kala bedelasho ama iib ama xadgudubkii sadexaad sadex sanno gudahood dhaqanxumadii ugu dambaysay ee uu ku talaabsaday ee la xidhiidha daroogadda:

- Ardayga waa la eryaya iyadii oo la siinayo waxbarasho aan ahayn dugsiyadda badiilka ah ee degmadda. Ardayda waxaa laga reebayaa dhamaan howlaha dugsiyadda degmadda iyo dhamaan dugsiyadda degmooyinka kale.
- Dib-ugu-soo noqoshadda dugsiyadda degmadda waa in lagu xidhaa dhamaysashadda ardayga ee barnaamijyadda dhaqancelinta(ee aysan dhaqaaluhu degmadu bixinaynin), marka lagu doro taxliilka kaadida(oo aysan degmadu dhaqaalaha bixinaynin).
- Aradyga/waalidka/hagaha waa loo ogolaanayaa barnaamijka si ay usiyyaan macluumaad la xidhiidha horumarka ardayga iyo jawaabta taxliila kaadida.

## 6. Caawinta Qoysaska

Howladeenadda degmaddu waa in ay caawiyaan qoysaska cadaynta illaha macluumaad ee bulshadda howlaha ku jeeda aalkoladda iyo daroogadda

## 7. Qorshaha Badiilka ah

Qoysasku waxay dooran karaan qorshaha badiilka ah ee lasoo jeedjiyo laba cisho gudahood waqtiga dhagaysiga. Si loom eel mariyo qorshaha badiilka ah oo loogu bedelo “xaaldaha daruuriga ah” waa in laga anxiyya maamulaha ama howlwadeenka loo idmaday iyo Xafiiska Anshaxa ee Ardayga.

Qorshayaasha badiilka ah ee Heerka A horumar la taaban karo waa in uu muujiyyaa afar todobaad gudahood laga bilaabo taariikhda dhagaysiga. Howlwadeenka dhagaysiga ayaa qeexaya astaha horumarka la taaban karo. Qorshaha badiilka ah waa in uu buuxiyaa shuruudahaa:

- qorshu waa in uu yahay dawayn, islamarkaana ka xooganyahay sida howlgalka loogu tilmaamay.
- waa in ay dugsiga ka teedaysaa falalka la xidhiidha daroogada in la mid ah ama ka badan tan howlgalka lagu tilmaamay,
- marka lagu doro 28ka cisho ee xanibaadda hadii heerka A ee xadgudubka iyo xanibaad aan ka yarayn 28 cisho hadii xadgudubka yahay Heerka B ama Heerka C
- marka lagu doro ogolaasho in la helo macluumaadka iyo warbixinadda joogtadda ah ee horumarka ardayga
- ka kooban shuruudaha iyo goobta dib-isu-diiwaangelinta goorta ardaygu dhamaysto qorshah,
- talaabadii la qaadi lahaa hadii ardaygu uusan wax horumar ah ka samayn dhamaystirka qorshahaa, iyo
- Nooca iyo waqtiga loo qabtay si loo ogaado hadii iyo goorta uu ardaygu dhamaysanayo ama uu isaga tagyo qorshaha.

**8. Rafcaan**

Ardayga ama waalidka/hagaha waxa uu ka diriri karaa go'aanka Heerka A, ugu horayntaba waxa uu codsanayaa fadhi uu la qaato maamualaha hadii usan maamuluhu gaadhin go'aan hore, kadibna waxaa uu codsan karaa in dib-loo-eego iyadii oo la adeegsanayo mas'uulka degmadda uqaabilsan kormeerka dugsiga ardaygu dhigto. Taasi waa halka ugu dambeeya ee dib-u-eegida. Go'aanadda Heerka A. Heerka B iyo Heerka C ee go'aanka howlwadeenka dhagaysiga waxaa laga qaadan karaa rafcaan iyadii oo la adeegsanayo rafcaanka eryidda ee 4.30.021-AD

**9. Diidmadda Ardayga.**

Ardayga aan horumar la taaban karo ka gaadhin gudashadda shuruudaha Heerka A afar todobaad gudahood laga bilaabo maalinta dhagaysiga waxa uu mudanyahay eryidd. Horumar la taaban karo waxaa lagu qeexaa isagii oo soo dhamaystay shuruudaha adeega beesha, hadii ay jiraan, iyo isagii oo aan lahayn maqnaansho cududaar la'an ah ee fasaladda anshaxa.

- Dhagaysiga eryiddu waxay imanysaa goorta ardaygu uusan uhogaansamin qaadashadda gudashadda waqtiga loo kordhiyey isaga oo dhamaystiraya dhamaan inta lagu tilmaamay qawaaniinta Heerka A. Dhagaysiga eryidda waa in la cadeeyo horumarka uu sameeyey dhamaystirka qawaaniinta Heerka A. MA AHAN in dib-loo-furo dhagaysiga Heerka A ee asalka ahaa(Ardayga aan dhigan dugsiga, dhagaysiga eryidda waa in la kulmaa maqnaashahooda.) hadii uu ardaygu ku jiro waxbarashadda gaadhka ah, xaadiridda iyo go'aan ka gaadhiduba waa daruuri iyadii oo dhamaan nidaamka Waxbarashadda Gaadhka ah IDEA la raacayo. Macluumaad dheeri ah, la xidhiidha isuduwaha Waxbarashadda Gaadhka ah.
- Hadii la cadeeyo in uusan ardaygu ka samaynin horumar la taaban karo dhamaystirka shuruudaha Heerka A, eryidda ama talaabadii kale ee ku haboon ayaa la qaadayaa, eryidda waa la dib dhigi karaa hadii ardayga loo ogolaado baraatijiyadda badiilka ah ee dugsi la ansixiyey ama adeegyadda dawaynta ee taabanaya xaaldaha daroogadda iyo aalkoladda ee ardayga. Inta lagu jiro xiligan ardayga waxaa laga reebayaa dhamaan howlaha dugsiyadda degmadda iyo dhamaan dugsiyadda degmooyinka kale oo dhan. Hadii barnaamijka badiilka ah ah ama adeegyadda dawadda uu si wanaagsan udhamaysto, eryiddi ma jiri doonto.
- Degmadu waxay kaloo warbixinta ardayga gaadhsinaysaa Maxkamadda Caruurta (Juvenile Court) iyadii oo la raacayo sharciyadda khususiyadka ee Federaalka, ku guuldaraysashadda raacidda taa iyadii oo ay la jirto shuruudaha anshaxa ee Heerka A, Heerka B iyo Heerka C

**10. Sheegid Aan Lagu Qasbin**

Ardayga isaga oo ujeedadiisu tahay helida caawinaad sheega dabciga aalkoladda/daroogadda tan oo lagu reebay nidaamkan maamul qayb ahaan ma noqon doonto in laga qaado talaabo anshax sheegida xaaladaa. Loomana aqoonsanayo qirasho-shakhsiyadeed marka ardaygu qirto adeegsiga Aalkoladda/daroogadda iyo/ama uu codsado caawinaad adeegsiga aalkoladda/daroogadda halkii baadhitaan loogu dhaqaaqi lahaa ay suuragal tahay in lagu eedeyyo. Arintani ma cadilayso xadidnaanta qarsoodiga macluumaadkaa ee xidhiidhka ardayga/lataliyaha.

**11. Qarsoodi**

Dhamaan macluumaadka la xidhiidha ka dawaynta ardayga aalkoladda iyo daroogadda waa qarsoodi.

**12. Ardayda Itaalka Daran**

Dhagaysiga waxaa loo qabanayaa cadaynta hadii xadgudub dhacay iyo hadii xadgudubku mudanyahay talaabo Heerka A, Heerka B, ama Heerka C. goorta la ogaado in xadgudubku yahay Heerka B ama Heerka C ama in ardayga Heerka A uu ku guuldaraystay in uu sameeyo horumar la taaban karo afar todobaad gudahood laga bilaabo taariikhda dhagaysiga, arinta waxaa loo duwayaa Kooxda IEP ama Kooxda Qaybta 504 si ay ucadeeyaan in dabcigu la xidhiidhsanyahay Itaaldaradda, (muuqashadda iyo go'aanka). Hadii uu wax un xidhiidh ah uu ka dhexeeeyo Itaaldaradda iyo dabcigaa, ardayga lama eryi karo. IEP ama Kooxda Qaybta 504 ayaa eegi doona qorshaha IEP ama Qaybta 504 iyo meelayouta iyagii oo bedeli kara hadii ay mudantahay. Waa in iyadii oo la adeegsanayo nidamkan dhacdadaas la qoro islamarkaana la meel mariyo si loogu waajijo xadgudub kan la nooc ah oo lagayaabo in uu dhaco mustaqbalka.

- Hadii uu qayb ka noqdo arday IEP, dabcigaasuna uusan ahayn mid la xidhiidhsan itaaldaradda sida lagu cadeeyey Kooxda IEP, ardayda waa la eri karaa ama uu ka qayb qaadan karaa barnaamijyadda kale. Iyadii oo la raacayo sharciga, iyadii oo aysan xaaladi jirin degmadu waxay joogin kartaa siinta adeegyadda waxbarasho ee ku salxidhan IEP.
- Hadii uu qayb ka noqdo arday ku jira qorshaha Qaybta 504, adeegyadda waxbarasho waa in aysan sii socon hadii uusan dabcigaasi la xidhiidhsanayn itaaldaro sida lagu cadeeyey Qaybta 504. Ardayga wa marin karaa anshaxa sida aradyda kale ee caadiga. Raadraac: [4.30.010-P](#), [4.30.022-AD](#), [4.30.025-AD](#)

### ***Marqaatiga Ardayda***

Hadii maclumaad ka yimi ardayga lasoo bandhigo xiliga dhagaysiga, aqoonsiga ardayga lama shaacin doono, xukunka howlwadeenka dhagaysiga, waxay samayn ku yeelanaysaa dugsiga ardayga. Hadii aan aqoonsiga ardayga marqaatiga ah la qarin, howlwadeenka dhagaysiga waa in uu si taxader leh oo toos ah wax uwaydiyyaa marqaatiga, sida qaadi oo kale waa uu si dhab ah u hibyaa maclumaadkaa, isaga oo waydiinaya su'aal walba oo ay codasadaan waalidka/hagaha/matalaha ardayga la ashtakeeyey.

### ***Ka Reebidda Xafladda Qalinjebinta***

Waxaa laga doonayaa in ardayda ku jira gabagabadda dugsiga sare laga reebo xaadiridda xafladaha qalinjebinta iyo howlaha la xidhiidha 60 cisho oo xidhiidh ah laga bilaabo maalintii ugu dambaysay ee lagu helay xadgudubka Qawaaniinta Daroogadda iyo Aalkoladda iyo xadgudub kasta oo dhalinya xanibaad ka badan sadex maalmood ama talaabo kale oo adag oo anshax. Raadraac: [4.30.022-AD](#)